



Telefoonka dhig oo baabuurka wad

Haddii aad tani ka akhriyeyso telefoonkaaga gacanta adiga oo wada baabuur, fadlan jooji. Khatarta wadista baabuurka la wado iyada oo la mashquulsan yahay waa mid si fiican loo ogyahay, laga bilaabo Oktoobar 1, waxaa jira xayiraad adag oo lagu soo rogay isticmaalka telefoonka gacanta inta la wado baabuurka, iyo sidoo kale ganaaxyo badan, taasi la siyaadinayo dembiilayaasha marar badan qalad sameeya.

Tan iyo 2009-kii, darawalada waxaa looga baahnaa in ay isticmaalaan qalab aan gacmaha-la isticmaalin si ay u sameeyaan wicitaanada telefoonka inta ay wadaan baabuurka. Sharciga cusub wuxuu darawalada ka mamnuucayaa isticmaalida wixii shaqo telefoon ah ee u baahan in gacanta lagu qabto. Darawaladu way daari karaan ama joojin karaan shaqada telefoonka, laakiin waa in ay ku koobnaataa hal taabasho ama gacan maris ‘swipe’.

Iyada oo la eegayo danta badbaado ee qof walba, PPS waxay doonaysa in dhammaan qoysaskeeda iyo shaqaalaheeda, iyo gaar ahaan darawalada markii ugu horeysay baabuur wadaa, ay si buuxda uga warqabaan sharciga cusub iyo waxa ay noqon karaan ganaaxyada loogu talagalay darawalada mashquulsan. Wixii sharaxaad buuxda oo ku saabsan sharciga cusub iyo Su'aalo & Jawaabo faa'iido leh, fadlan fiiri maqaalkan ka socda ee Wargeyska ‘The Oregonian’:

http://www.oregonlive.com/commuting/index.ssf/2017/09/oregons_new_distracted_driving.html